Minneapolis Health Department

# DIFAACIDDA CARRUURTA IYO ISKUULKA EE COVID-19

Waxaa nagu soo dhow wakhtigii iskuulka la furi jiray!
Carruurta gaartay 12 jirka iyo wixii ka weyn waxay qaadan karaan tallaalka Pfizer COVID-19. Carruurta loo oggol yahay oo dhan waa in la soo tallaalo si ay iskuulka ugu soo noqdaan iyaga oo badbaada qaba.



## Tallaalku waa difaac!



Tallaalka COVID-19 wuxuu ilmaha iyo dadka ka difaacayaa in uu faayrasku ku dhaco iyo in uu sii faafo. Haddii ilmaha laga tallaalo COVID-19, tallaalku waxa uu ka hortagayaa in ay si daran ugu xanuunsadaan.

Dadka sida buuxda loo tallaalay difaac adag ayey ka haystaan faraca cusub ee Delta. Faracan cusub ee COVID-19 si degdeg ah ayuu u faafayaa oo dadka aan laga tallaalin ayuu khatar aad u badan ku hayaa.

Tijaabooyinkii la sameeyey oo dhan ee tallaalka Pfizer waxay noqdeen kuwa waxtar iyo badqabid u leh carruurta gaartay 12 iyo kuwa ka weyn. Tallaalkan kuma jiro faayrus nool oo dadkana kama dhigi karo madhaley.

### 5 TODDOBAAD KA DIB AYUU TALLAALKU DADKA U SHAQEYNA HADDA ISKUULKA INTA UUSAN BILAABAN SOO TALLAAL ILMAHAAGA



Tallaalka Koowaad: Ugu-dambeyn 2-da Ogoosto → Tallaalka Labaad: Ugu-dambeyn 23-ka Ogoosto → Carruurta oo dhan tallaalkoodii ayey qaateen marka iskuulka loo furo

## Si aad u ogaato tallaalka COVID-19 kilinig laga heli karo:

- Kala hadal dhakhtarka ilmahaaga ama weydiiso farmashiye kasta.
- Booqo www.tinyurl.com/mplsvax ama www.mn.gov/covid19/vaccine